

Habka loo qaadayo candhuufta laga baarayo Tiibishada (TB) **Instructions for Collecting Sputum for Tuberculosis (TB)**

Waxaa lagu warsaday inaad seddex aroor candhuuf (xaako) keentid. Si aad candhuufta u keentid waxaa lagu siiyey seddex weel oo lagu qaado iyo bac caag ah. Weelasha waxaa lagu qoray magacaaga iyo lambarrada “1”, “2”, iyo “3”, ee seddexda maalmood ee isxiga. **Fadlan marna ha taabanin weelasha gudahooda.**

Xusuusnow: Waa muhiim inay candhuuftu/xaakada baaritaanku kasoo go’do sambabada. MAAHA dhareer (dhareerka afka).

Haddii aadan iska keeni Karin candhuuf/xaako fur qasabadda qubeyska ilaa qolku buuxiyo uumi (*fadlan iska ilaali biyaha kulul oo buux dhaafa oo karkara*). Albaabka xiro oo dhexfariiso qolka uumiga ilaa 5-10 daqiiqo, kadibna isku day. Haddii kale, biyo qandaca ku qubeyso intaadan iska keenin candhuufo. Feeraha oo inaad iska riixdid, neef qaadatid, dabadeedna aad qufacdid oo xaakootid.

Habraac:

1. Markii aad subaxdii soo toosto, **oodan weli rumayan, wax cunin, ama cabin,** fadlan kusoo rid xaakada weelka “1”. (Hubi inaysan calyo kaliya iman).
2. Qor maalinta iyo waqtiga aad ku ridday xaakada weelka “1”.
3. **FADLAN DABOOLKA KU DHUUJI SI AANAY UGA QUBAN**
4. Weelka ku rid baddii lagu siiyey.
5. Weelka oo ku jira baddii gali qaboojiyaha, **maaha qaybta baraf dhaliyaha.**
6. Ku celi tallaabooyinka 1-5 subaxyada kuxiga eed isticmaalaysid weelasha (lagu qora “2” and “3”).
7. Ku soo celi weelashaas bukaan-socod eegtada Feeraha/TB ama qaybta barashada cudurrada (hadba midkii lagugula taliyo), **sida ugu dhaqsiiyaha badan,** markii aad weelka seddexaad ku xaakootid. Weelasha oo qabow oo laga ilaaliyey ifka qoraxda kusoo celi cusbitaalka.

Xusuusnow: Waxay qaadan kartaa ilaa 3 maalmo-shaqo inta jawaab her laga heli karo, iyo 6 - 8 toddobaad inta laga heliyao jawaabta abuurista jeermiga. Kal-kaaliyaha bukaan-socod eegtada ayaa kula socodsiin doona wixii isbeddel ah.

Haddii aad su’aalo ka qabtid sida loo soo qaadayo kambayoonaha, fadlan kala soo xiriir bukaan-socod eegtada:

Mahadsanid